XAFIISKA AGAASIMAHA
Kate Brown, Barasaabka

Oregon Health Authority

500 Summer St NE E20
Salem OR 97301
Codka: 503-947-2340
Faakiska: 503-947-2341

Taariikhda: Janaayo 11, 2022

Go'doominta iyo Karantiilka COVID-19

Shakhsiyaadka jooga agagaarka Oregon ee uu u go'aamiyay inay yihiin kuwo loo malaynayo ama loo xaqiijiyay kiise COVID-19 ah, ama xiriir dhow, bixiyehooda daryeelka caafimaadka, ama gobolka ama saraakiisha caafimaadka dadweynaha ee degaanka waa inay raacaan shuruudahan karantiilka iyo go'doominta.

Ku guuldareysiga in loo hoggaansamo hagistan waxay sababi kartaa in maamulka caafimaadka bulshada ee gobolka ama degmada soo saaraan amar go’doomin ama karantiil ah oo degdeg ah, ama ay raadsadaan amar maxkamadeed oo ku saabsan go’doominta ama karantiilka sida ku cad ORS 433.121 ilaa 433.140.

Fiiro gaar ah:

Dukumeentigani wuxuu khuseeyaa guud ahaan dadweynaha **laakiin ma khuseeyo**:

- Shaqaalaha, deganayaasha ama bukaanada goobahan:
  - Xarumaha daryeelka muddada dheer
  - Guryaha waayeelada lagu xannaaneeyo
  - Goobaha daryeelka caafimaadka ee la dego (tussaale ahaan, xarumaha daaweynta caafimaadka habdhaqanka ee la dego, guryaha kooxaha ee loogu talagalay dadka naafada ah ee qaba naafonimada garaadka ama korriinka)
  - Goobaha daryeelka caafimaadka bukaan-jiifka (tussaale ahaan, isbitaallada, hoyga bukaan-jiifka maliilsan)
  - Xarumaha dhaqan celinta (sida, jeelasha iyo xabsiyada)
  - Goobaha kale ee la isku ururso (tusaale, hoyga hoylaawayaasha, guryaha ku meel gaarka ah)
- Ardayda iyo shaqaalaha u baylah noqday goobaha dugsiga K-12

Go'doominta COVID-19 iyo hagida karantiilka ee lagu dabaqo goobaha kor ku xusan waa inaad la xiriirtaa xarunta, dugsiga, ama maamulka caafimaadka dadweynaha ee degaankaaga.

Qeexitaano: Ujeedooyinka hagistan dartood, qeexitaanada soo socda ayaa lagu dhaqmidoona:

- “Xiriir Dhow” waxaa loola jeedaa shaqsi ugu baylah noqday si la taaban karo kiis loo qaateen ah ee COVID-19 ama kiis la xaqiijiyay ee COVID-19.
- “Kiis La Xaqiijiyay ee COVID-19” waxaa loola jeedaa shaqsi laga helay cudurka COVID-19 markii lagu sameeyay baaritaanka unugyada muhiimka ah ee jirka ama baaritaanka wax walbo jirka ka tirsneyn, ama qaab kale ay u tixgeliyeen mid lagu kalsoonaan karo maamulka caafimaadka dadweynaha ee gobolka ama degmada.
- “Gooni Ahaansho” ama “go'doomin” waxaa loola jeedaa kala-soocida iyo xaddidida jireed ee qof qaba cudurka ama si macquul ah loo rumaysan yahay inuu ka soo qaaday cudur la isqaadsiin karo shakhsiyaad aan la gooniyeyn si looga hortago ama loo xaddido u gudbinta cudurka shakhsiyaadka aan la gooniyeyn.
- “Maamulaha caafimaadka bulshada ee degmada” ayaa macnaha ereyga ku bixiyeenl gudaha ORS 431.003.
- “Kiis COVID-19 oo mala awaal ah” waxaa loola jeedaa shaqsi qaba astaamo u dhigma COVID-19 oo xiriir dhow la yeeshay shaqsi la xaqiijiyay inuu qabo COVID-19 2 ilaa 14 maalmood kahor maalmaha astaamuhu bilowdeen; ama uu yesxho natiijo baaris bositive ah oo ka timid xirmada baadhista antigen-ka ee guriga.
- “Karantiil” waxaa loola jeedaa kala-soocida iyo xaddidaada jireed ee shaqsi baylah u noqday ama laga yaabo inuu baylah u noqday cudur la isqaadsiin karo oo aan ka muuqan calaamado ama astaamo cudurkaas la is qaadsiiyo, shakhsiyaadka aan la kulmin cudur faafa, si looga hortaggo ama xaddido u gudbinta cudurka dadka kale, si looga hortago ama loo xaddido u gudbinta cudurka dadka kale.
- “Sarkaalka caafimaadka gobolka” waa Sarkaalka Caafimaadka Dadweynaha la magacaabay sida ku cad ORS 431.045.
- “U-baylah noqosho la taaban karo” waxaa loola jeedaa inaad:
    - 6 cag u jirsatay kiis la xaqiijiyay oo COVID-19 ah ama kiis mala awal ah oo COVID-19 ah muddo 15 daqiiqo ah ama ka badan hal maalin gudaheeda.
    - Taabatay dheecaano jeermis leh ama muunado caafimaad ee kiis la xaqiijiyay ee COVID-19 ama kiis loo qaateen ah ee COVID-19.
- “la cusboonaysiiyay oo leh tallaallada COVID-19 ee ay ACIP ku-talisay” macnaheedu waa qofka u qalma iyo:
    - Haddii uu jiro 18 sano ama ka weyn:
        - uuna helay laba (2) qiyaasood oo ah 2-qiyaas oo ah tallaalka COVID-19 ee taxana aasaasiga ah 5-tii bilood ee la soo dhaafay gudahood; ama
        - uu helay hal (1) qiyaas oo ah 1-qiyaas oo ah tallaalka COVID-19 ee taxana aasaasiga ah 2-dii bilood ee la soo dhaafay gudahood; ama
        - uu dhamaystay 1-ama-2 qiyaas ee aasaasiga ah ee tallallka taxanaha ah ee COVID-19 iyo ee taxana ah 2-dii bilood ee la soo dhaafay gudahood; oo u helay qiyaasta tallaalka xoojinta COVID-19.
    - Haddii uu jiro 5 ilaa 17 sano:

- uuna helay 2 qiyaasood oo ah 2-qiyaas oo taxanaha aasaasiga ah ee tallaalka COVID-19

Kiisaska la xaqiijiyay ee COVID-19 ama kiisaska loo qaateenka ah ee COVID-19 waxaa loo baahan yahay in:

- Is go'doomi ugu yaraan (5) maalmood kadib marka uu cudurku ku bilowdo iyo ilaa 24 saacadood kadib marka xumadu ka jabto, iyadoo aadan isticmaalin xannuun baa'bi'iyeyaal, oo astaamaha COVID-19 (xumad, qufac, neefta oo gaabata, iyo shuban) ay soo raysanayaan.
- Is go'doomi ugu yaraan (5) maalmood kadib taariikhda qaadista muunada laga helay cudurka hadduu astaamo qabin ama kaliya leeyahay astaamo aan ka ahayn qandho, qufac, neef-qabad iyo shuban-biyood.
- Is go'doomi ugu yaraan 10 maalmood haddii aad qabto jirro daran oo ba'an oo la xiriirta COVID-19, haddii isbitaal lagu dhigo COVID-19 dartiis, ama haddii shaqsigu leeyahay habdhiska difaaca jirka oo aad u liita.
- Ku xirnow maamulka caafimaadka bulshada ee degmada ama gobolka oo raac tallooyinka caafimaadka bulshada.

Taabashooyin dhow:

- Kuwa aan ku cusboonayn tallaalada COVID-19 ee ay ACIP kula talisay **ayaa looga baahan yahay inay**:
    - Is Karantiilaan ayagoo guriga joogaya oo ugu yaraan lix (6) foot u jira qof walba, oo ay ku jiraan xubnaha qoyska, shan (5) maalmood ka dib markii ay la kulmeen qof qaba COVID-19 oo ay wejiga xirtaan marka ay agagaarka dadka kale ay joogaan shan maalmood (5) oo dheeraad ah.
    - Is karantiilaan 10 maalmood haddii ay awoodi wayaan inay xirtaan maaskaro
    - Xirtaan maaskaro muddo 10 maalmood ah agagaarka dadka kale haddii ay awoodiwayaan inay is karantilaan
- Kuwa ku cusboon talaalkooda COVID-19 ee ay ACIP kula talisay loogama baahna inay is karantilaan balse waa **inay** xirtaan maaskaro agagaarka kuwa kale ee guriga jooga iyo banaanka 10 maalmood ka dib soo-qaadhista.
- Waa in, iyadoon loo eegin heerka tallaalka, la baaro shan (5) maalmood ka dib soo-qaadhistooda.
- Waa inay la socdaan naftooda calaamadaha maalin kasta ee 10 maalmood oo buuxda ka dib soo-qaadhistoodii ugu dambeeysay ee qof qaba COVID-19 maadaama ay jirto fursad yar laakiin weyn oo ah in muddada karantiilka oo la gaabiyo ay keeni karto gudbinta karantiilka ka dib. Haddii aastaamaha ay soo baxaan, shaqsigu waa inuu ku laabto karantiilka, ogeysiiyaan maamulka caafimaadka dadweynaha ee deegaankooda iyo daryeel-bixiyahooda caafimaad, oo ay is baaraan.

- **Ma u baahan yahay** in aad is karantiisho sida waafaqsan tilmaantan marka la xaqiijiyo ama la mala awalo kiis COVID-19 ah inta lagu jiro karantiilka
- xiriir dhow la yeelo maamulka caafimaadka bulshada ee degmada ama gobolka oo raac tallooyinka caafimaadka bulshada.

Shakhsiyaadka waa inay, laakiin loogama baahna inay:

- Karantiil ama go'doon galaan haddii mas'uuliyiinta caafimaadka bulshada ee tuulada, gobolka ama degmada go'aamiyaan, iyadoo lagu saleynayo dib-u-eegida xaqiiqooyinka gaarka ah, in talaabada noocaas ah ay lagama maarmaan tahay si loo dhowro caafimaadka bulshada, inkastoo shakhsigu uusan buuxin qeexitaanka xiriir dhow ama kiis loo qaateen ah ama la xaqiijiyay ee COVID-19.

Ka dhaafida shuruudaha karantiilka si loogu laabto shaqada

Shakhsiyaadka buuxiya qeexida xiriir dhow ***oo aan astaamo ahayn,*** xannibaadaha karantiilku waa la qaadi karaa si shakhsigu ugu soo laabto shaqada haddii **dhammaan** shuruudaha soo socda la buuxiyay:

- Sarkaalka ama wakiilka caafimaadka gobolka, ama maamulka ama wakiilka caafimaadka bulshada ee degmada, ayaa go'aansaday in shaqada shaqsigu ay tahay adeeg muhiim ah ayna jirto shaqaale yaraan; [1]
- Goobta shaqada ee shaqsiga waxay bixisaa kahortag buuxa oo ka dhan ah u gudbinta cudurka dadka kale ee jooga goobta shaqada;
- Batrooniga shaqsiga wuu ka war qabaa xaalada karantiil ee shaqsiga wuxuuna diyaar uyahay in shaqsigu ku soo laabto shaqada;
- Shaqsigu wuxuu oggolaanayaa inuu xirto maaskaro caafimaad ama maaskarada N95 inta uu shaqada ku jiro wuxuuna joogteynayaa ugu yaraan lix (6) cag inuu u jirsado dadka kale mar walba; **oo**
- Sharciyada Caafimaadka iyo Badqabka Shaqada ee Oregon kama mamnuucayaan shaqsiga inuu ku noqdo shaqada.

Ka dhaafida hagistan karantiil waa in la qoraa shaqsiguna waa inuu weli indha-indheeyaa shuruudaha karantiil marka uusan shaqada ku jirin.

Dhigaalada Dheeraadka ah

- Macluumaad dheeri ah oo ku saabsan go'doominta iyo tixgalinta karantiilka ee soo-qaadhista goobta dugsiga K-12, eeg Dugsiyada Diyaarsan ee Waaxda Waxbarashada ee Oregon, agabka ardayda ee Badbaadada leh.

[1] Go'aaminta waxa ah adeeg muhiimka ayaa la gaari doonaa iyadoo isuduwid isla sameynayaan maamullada gobolka iyo degmada iyo guddiga kormeerka sharciyeed ee waaxdaas.

- Ogow xaqiiqooyinka ku saabsan COVID-19
- Dhigaalada COVID-19 ee loogu talagalay bulshada oo ay ku jiraan dhigaalada loogu talagalay shaqaalaha, batrooniyada, dadka naafada ah, iyo bulshooyinka kale.

Helitaanka dukumiintiga: Shakhsiyaadka naafada ah ama shakhsiyaadka ku hadla luuqad aan ka aheyn Ingiriis, OHA waxay ku bixin kartaa warbixinta qaabab kale oo dadban sida fasiraadaha, daabicida farta waaweyn, ama farta indhoolayaasha. La xiriir Qeybta Isgaarsiinta COVID-19 ee 1-971-673-2411, 711 TTY ama COVID19.LanguageAccess@dhsoha.state.or.us